Ireland

An Roinn Dlí agus Cirt,
Gnóthaí Baile agus Imirce
Department of Justice,
Home Affairs and Migration

euaa
EUROPEAN UNION
AGENCY FOR ASYLUM

# WAXAA UGA BAAHAN TAHAY INAAD KA OGAATO HABRAACA MAGANGALYADA EE XUDUUDKA



SOMALI

**Waxaad hadda ku sugan tahay Ireland, kaasoo ah waddan ka tirsan EU+. Waddamada EU+ waa:**

- 27-ka Dowladdood ee Xubnaha ka ah Midowga Yurub (EU): Austria, Belgium, Bulgaria, Croatia, Cyprus, Czechia, Denmark, Estonia, Finland, France, Germany, Greece, Hungary, Italy, Latvia, Lithuania, Luxembourg, Malta, Netherlands, Poland, Portugal, Republic of Ireland, Romania, Slovakia, Slovenia, Spain, Sweden iyo
- 4 waddan oo kale: Iceland, Liechtenstein, Norway iyo Switzerland.

## TUSMADA


Waa maxay ilaalinta caalamiga ah (magangalyada)? 3

Waa maxay habraaca magangalyadu? 4

- Waa maxay habraaca magangalyada ee xuduudka ? 6
- Intee inle'eg ayay qaadan kartaa? 7
- Waa halkee goobta iyo goorta ay ka dhici doonto diiwaangelinta iyo gudbinta codsigaagu? 8
- Maxaa dhici doona inta lagu guda jiro diiwaangelinta iyo gudbinta codsiga? 9
- Muxuu noqon doonaa habraacu haddii ay kula socdaan carruur ama qof weyn oo kugu tiirsan? 12
- Waddankee ayaa baadhi doona codsigaaga? 13
- Sidee ayaa codsigaaga loo badhi doonaa? 14
- Sidee ayaad ku heli doontaa go'aanka codsigaaga ilaalinta caalamiga ah? 17

Waa maxay xuquuqahaagu? 18

Waa maxay waajibaadkaagu? 22

Waa maxay cawaaqibka ka dhalan kara haddii aanad kasoo bixin waajibaadkaas? 26

Sidee ayay maamulka u tixgelin doonaan baahiyaha gaarka ah? 28

Maxaa dhici doona haddii aad rabto inaad ku laabato wadankaaga? 29

## WAA MAXAY ILAALINTA CAALAMIGA AH?

Waxa laga yaabaa inaad u baahato ilaalin caalami ah haddii aadan ku laaban karin wadankaaga sababtoo ah waxaad ka baqaysaa cadaadis ama khatar dhab ah oo dhibaato weyn kugu ah. Tani waxay ka dhigan tahay, tusaale ahaan, in noloshaada ama xorriyaddaada ay khatar ku jirto, isla markaana maamulka wadankaagu aanu kaa ilaalin doonin khatarta aad wajahayso.

Waxaa xaq u leedahay inaad codsato ilaalin caalami ah.

Yurub gudaheeda, ilaalinta caalamiga ah waxay qaadan kartaa dhawr nooc oo kala duwan: **xaalada qaxoontiga** ama **ilaalinta aan buuxin**.

Ilaalinta caalamiga ah waxa sidoo kale loo yaqaanaa magangalyada.



## WAA MAXAY HABRAACA MAGANGALYADU?


Inta lagu jiro habraaca magangalyada, maamulku waxay qiimayn doonaan haddii aad u baahan tahay ilaalin caalami ah, haddii ay sidaas tahayna, nooca ilaalinta ee kugu habboon. Inta lagu jiro habraaca waxaad fursad u heli doontaa inaad sheegto dhammaan sababaha aad uga tagtay gurigaaga iyo dalka aad asal ahaan kasoo jeedo. Si daacadnimo leh ugu sheeg saraakiisha dhammaan sababaha aad uga soo tagtay dalkaaga.

Markaad weydiisato ilaalin caalami ah, waxaa laguu tixgeliyaa codsade ilaalin caalami ah.



Macluumaad kasta oo aad la wadaagto maamulka waxay ahaan doonaan kuwo sir ah. Macluumaadkan lalama wadaagi doono kuwii aad kasoo carartay.

Habraaca magangalyadu waxa kamid ah tallaabooyinkan soo socda.



## WAA MAXAY HABRAACA MAGANGALYADA EE XUDUUDKA?



Habraaca magangalyada ee xuduudka micnahiisu waxa weeyi inta lagu jiro baadhista codsigaaga:

- Laguuma siin ogolaansho sharci ah inaad gasho Gobolka
- waa inaad joogtaa Xarunta Hoyga IPAS

Haddii ay kula socdeen qoyskaaga, waxaa lagu dejin karaa adiga iyo xubnahaaga qoyska ee kuu dhaw (xaaskaaga, lamaanahaaga, carruurta yar-yar iyo carruurta waaweyn ee kugu tiirsan).

**Habraaca magangalyada ee xuduudka waxa lagu codsan karaa mid kamid ah caqabadahan soo socda:**



- waxaad u timiday si aan joogto ahayn oo waxaad weydiisatay ilaalin caalami ah intii aad ku sugnayd xuduudka laga talaabayo ama goob lagasii gudbayo



- waxaad si aan joogto ahayn uga gudubtay xuduudka



- waxaa lagaasoo badbaadiyay badda



- waxaa lagaasoo wareejiyay waddan kale oo EU+ ah

Habraaca magangalyada ee xuduudka waxa loo codsadaa dhawr sababood, tusaale ahaan haddii:

- aad si kutalagal ah usoo bandhigtay macluumaad been ah ama dhokumantiyo, ama aad hayso macluumaad kula xidhiidha ama dhokumantiyo la xidhiidha aqoonsigaaga ama dhalashadaada, ama waxaad burburisay aqoonsi ama dhokumanti socdaal; ama
- waxaad keenaysaa khatar amni; ama
- Dadka ka soo jeeda dalkaaga ee codsada ilaalin caalami ah badanaa ma waajahaan halis ah in la ciqaabo ama la gaadhsiiyo dhaawac weyn.

Waxaad weydiin kartaa maamulka sababta habraaca magangalyo ee xuduudku loogu dabaqay kiiskaaga.

## INTEE INLE'EG AYAY QAADAN KARTAA?



Habraaca magangalyo ee xuduudku wuxuu qaadan karaa ilaa 12 toddobaad laga bilaabo maalinta codsigaaga la diwaangaliyay. Haddii laguu wareejiyo dal kale oo EU+ ah, habraacu wuxuu qaadan karaa ilaa 16 toddobaad.

Haddii aadan ku helin go’aan muddadan gudaheeda, waxaa laguu oggolaan doonaa inaad gasho dhulka dalka lagu baadhayo codsigaaga.

Xaaladaha gaarka ah, waxaa laga yaabaa in weli aan laguu oggolaan inaad gasho dhulka oo si xor ah u dhaqaaqdo, inkastoo aadan helin go’aan 12 ama 16 toddobaad gudaheeda ah. Maamulku wuxuu kugu wargalin doonaa oo ku siin doonaa sharaxaad dheeraad ah haddii ka reebistan ay kugu habboon tahay.


## WAA HALKEE GOOBTA IYO GOORTA AY KA DHICI DOONTO DIIWAANGELINTA IYO GUDBINTA CODSIGAAGU?

Codsigaaga ilaalinta caalamiga ah waxaa laga diiwaan gelin doonaa Xarunta Baaritaanka ee Citywest. Tani waa inay dhacdaa ugu yaraan 10 maalmood gudahood marka la sameeyo codsigaaga ilaalinta caalamiga ah.

Marka codsigaaga la diiwaan geliyo, waa inaad ku gudbisaa Xarunta Baaritaanka ee Citywest taariikhda iyo waqtiga laguu soo sheegi doono inta lagu jiro diiwaangelinta.

Soo gudbinta codsigaagu waa inay dhacdaa ugu yaraan 5 maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda diiwaangelinta codsigaaga.

Aad ayey muhiim u tahay inaad gudbiso codsigaaga. Haddii aad ku guuldareysato inaad gudbiso codsigaaga, waxaa loo tixgelin doonaa in laga noqday, haddii aan sababta guuldarradani aysan ahayn mid ka baxsan xakamayntaada. Taas macnaheedu waa inaad waayi doonto heerkaaga codsade ahaan, xuquuqdaada taageerada iyo adeegyada iyo xuquuqda aad ku joogi karto dalkan.



## MAXAA DHICI DOONA INTA LAGU GUDA JIRO DIIWAANGELINTA IYO GUDBINTA CODSIGA?



Farahaaga ayaa la qaadi doonaa.



Sawirkaada ayaa la qaadi doonaa.




Waxaa lagu weydiin doonaa inaad soo bandhigto dhammaan dhukumentiyadaada aqoonsiga, safarka, iyo dhukumentiyada kale ee khuseeya.



Waxa lagu weydiin doonaa inaad sheegto faahfaahinta shaqsiga ah. Waxaa sidoo kale lagu weydiin doonaa xubnaha qoyskaaga ka mid ah ee ku nool dalkaas ama dal kale oo EU+ ah.




Waxa lagu weydiin doonaa inaad bixiso faahfaahinta halka lagaala soo xidhiidhayo (cinwaanka, lambarka taleefanka iyo cinwaanka iimaylka).



Adiga iyo alaabtaada waa la idin baadhi karaa. Hantidaada gaarka ah waxay ahaanaysaa mid adiga kuu gaar ah waxaana laguu soo celin doonaa, marka laga reebo hantida loo arko mid khatar ah.



Waxaa lagu weydiin doonaa su'aalo ku saabsan caafimaadkaaga iyo wax kasta oo u nugul si loo ogaado haddii aad u baahan tahay taageero gaar ah



Waxaa lagu weydiin doonaa inaad soo gudbiso dhammaan macluumaadka iyo dhukumentiyada la heli karo ee taageeraya codsigaaga. Tani waxaa kamid ah macluumaadka iyo dhukumentiyada ku saabsan:

- wadankaaga hooyo iyo waddan kasta oo aad ku soo noolaatay
- sababaha aad uga soo tagtay wadankaaga iyo sababta aanad u rabin inaad u laabato
- asalkaaga iyo asalka qoyskaaga
- faahfaahin ku aadan safarkaaga aad ku tagtay ee ku dhex joogto Yurub
- codsiyadii hore ee ilaalinta caalamiga ah.

Kala horaynta tallaabooyinkan wuu kala duwanaan karaa, laakiin dhammaan codsadayaasha si isku mid ah ayaa loola dhaqmaa. Xogta la ururiyey si ammaan ah ayaa loogu kaydin doonaa xog-ururinta qaranka iyo tan Yurub.

Waxa waajib kugu ah oo danahaagu ku jiraan inaad sheegto runta oo aad la shaqayso maamulka.



Marka aad is ee aad gudbisay codsigaaga, waxaad heli doontaa dhokumanti rasmi ah kaasoo sheegaya inaad tahay codsade ilaalin caalami ah. Dukumentigan waxaa loo yaqaan Kaarka Codsadaha Ilaalinta Caalamiga ah waxaana lagu kaydin karaa taleefankaaga.

Waa inaad mar walba la socotaa.

## MUXUU NOQON DOONAA HABRAACU HADDII AY KULA SOCDAAN CARRUUR AMA QOF WEYN OO KUGU TIIRSAN?



Haddii ay kula socdaan:

- carruurtaada oo ka yar da'da 18 ama
- carruurta ka yar da'da 18 kuwaasoo aad masuul ka tahay sharci ahaan

waxay u baahan yihiin inay codsadaan ilaalin caalami ah sidoo kale. Carruurtu waxay u baahan yihiin inay kuu raacaan maamulka.

Haddii carruurtu ay yihiin 18 sano jir ama ay ka weyn yihiin, waa inay gudbistaan codsigooda.




Haddii aad masuul ka tahay qof 18 sano jira ama ka weyn oo leh naafonimo ka hor istaagaysa inuu go’aan gaadho, waxaad codsan kartaa ilaalin caalami ah oo aad gudbin kartaa codsiga iyaga oo matalaya.

Qofkaas waa inuu joogaa adiga agtaada inta la gudbinayo codsiga.



## WADDANKEE AYAA BAADHI DOONA CODSIGAAGA?




Waxa laguu dammaanad qaadayaa in dal ka mid ah EU+ uu baadhayo codsigaaga ilaalinta caalamiga ah. Ma dooran kartid wadanka.

Maamulku waxay raaci doonaan habraac lagu go'aaminayo dalka EU+ ee mas'uulka ka noqon doona codsigaaga ilaalinta caalamiga ah. Tan waxaa lagu magacaabaa habraaca go'aaminta masuuliyada.

Si taas loo gaadho, waxaad u baahan doontaa inaad masuuliyiinta u sheegto waxyaabaha soo socda.

- Haddii ay jirto xubin qoyskaaga ka mid ah oo ku sugan waddan kale oo ka tirsan EU+.
- Haddii waddan kale oo ka tirsan EU+ uu hore kuu siiyay fiiso ama dhukumanti deggenaansho. (Fiisahu wuxuu kuu ogolaanayaa inaad booqato wadanka. Tan waxa laguugu dhajin doonaa baasaboorkaaga. Dhukumentiga deganaanshuhu waa dhokumanti kuu ogolaanaya inaad joogto wadanka.)
- Haddii aad hore u gashay waddan kale oo ka tirsan EU+.
- Haddii aad marhore ka codsatay ilaalinta caalamiga ah waddan kale oo EU+ ah.
- Haddii waddan kale oo EU+ ah ku siiyay diblooma aqooneed ama tacliin.

Haddii masuuliyiintu aaminsan yihiin in waddan kale oo ka tirsan EU+ uu mas'uul ka noqon karo baarista codsigaaga, waxaad heli doontaa macluumaad faahfaahsan oo dheeraad ah oo ku saabsan habraacan iyo xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga.

Waxaad raadin kartaa macluumaad dheeraad ah buug-yare ka duwan.

## SIDEE AYAA CODSIGAAGA LOO BADHI DOONAA?

### BAADHIITAANKA U-QALMITAANKA

Xaalado qaar, waxaa jiri doona baadhis hordhac ah oo ku saabsan codsigaaga.

Baadhistan hordhaca ah waxaa loo yaqaan baadhitaanka u-qalmitaanka waxayna qaadan kartaa ilaa 2 bilood.

Tan macnaheedu waxa weeyi maamulku waxay marka hore  lixda baadhi shantan su'aalood ee soo socda.

- Miyaad marhore ka codsatay ilaalinta caalamiga ah waddan kale oo EU+ ah?
- Ma hore ayaad uga heshay ilaalin caalami ah waddan aan ka tirsaneyn EU, halkaas oo aad ammaan ku ahaan karto isla markaana aad ku laaban karto?
- Ma laguu oggolaan karaa inaad dib ugu noqoto waddan aad ammaan ku tahay oo codsigaaga ilaalinta caalamiga ah lagu baadhi karo?
- Ma codsatay ilaalin caalami ah in ka badan 7 maalmood kadib markii la soo saaray go'aan ku saabsan soo celintaada?
- Ma maxkamad ama guddi dambiyo caalami ah ayaa kuu fududeeyay in si ammaan ah lagu geeyo waddan kale, mise maxkamad ama guddi dambiyo caalami ah ayaa haatan ku hawlan arrintaas?
- Ma mar kale ayaad codsatay ilaalin caalami ah kadib markii codsigaaga la diiday adigoon soo gudbin wax xog ama caddeymo cusub? Shayo cusub oo aad soo gudbiso waxay noqon karaan xaqiiqooyin cusub kuwaasoo soo bandhigaya inaad u baahan tahay ilaalin caalami ah.



Waxa lagugu martiqaadi doonaa si lagaaga waraysto su'aalahan. Tan waxa loo yaqaanaa **waraysiga la aqbali karo**. Inta lagu jiro waraysigan, waxaa sidoo kale lagaa weydiin karaa sababaha aad ugu codsatay ilaalinta caalamiga ah iyo sababta aadan u doonaynin inaad dalkaaga ugu laabato.

Iyadoo ku xidhan xaaladahaaga marka loo eego su'aalaha kor ku xusan:

- codsigaaga waa la diidi karaa, ama
- Hannaanka ayaa sii socon doona, waxaana maamulku eegi doonaan haddii aad u baahan tahay ilaalinta caalamiga ah.

Shaqaalaha Xafiiska Ilaalinta Caalamiga ah  Waxa lagugu wargelin doonaa haddii baadhitaanka u-qalmitaanka uu ku khuseeyo, waxaana laguu sharxi doonaa faahfaahin dheeraad ah.

# SIDEE AYAA CODSIGAAGA LOO BADHI DOONAA?

## BAADHISTA CODSIGAAGA

Maamulku waxay eegi doonaan haddii aad u baahan tahay ilaalinta caalamiga ah.



Waxa lagugu martiqaadi doonaa **waraysiga gaarka ah**.

Waxaad heli doontaa martiqaad laguugu soo diraayo akoonkaaga elektaroonigga ah ee ku yaal Bogga Ilaalinta Caalamiga ah, ama boostada ama iimayl, ka dib marka aad codsigaaga gudbiso.

Waraysigu wuxuu ku dhici doonaa si fool-ka-fool ah ama, kiisaska gaarka ah, si fogaan arag ah.

Dhagaysiga waraysiga waa la duubi doonaa.

Waraysigu waa fursadda aad ku faahfaahin karto sababaha aad ugu codsanayso ilaalinta caalamiga ah iyo sababta aadan u doonaynin inaad dalkaaga hooyo ku laabato.
Waa inaad kasoo qeybgashaa waraysiga gaarka ah oo aad timaadaa wakhtiga loogu talagalay. Haddii aadan ka soo qaybgelin wareysiga gaarka ah adigoon haysan sabab dhab ah oo caddayn wadata, codsigaaga waxaa loo tixgelin doonaa mid la joojiyey, oo kiiskaagana dib ayaa loo eegi doonaa. Haddii aad diido ka jawaabista su'aalaha inta lagu jiro waraysiga adigoon haysan sabab macquul ah, codsigaaga sidoo kale waxaa loo tixgelin doonaa mid la joojiyey.

Codsade kasta oo qaangaadh ah waxa lala yeelan doonaa waraysi gaar ah.

Kadib waraysiga gaarka ah, codsigaaga waa la qiimayn doonaa. Maamulku waxay go'aamin doonaan haddii aad heli doonto ilaalinta caalamiga ah ama aanad heli doonin.

Xaaladaha gaarka ah, waraysiga gaarka ah dhici doono. Maamulku wuxuu kugu wargalin doonaa haddii tani ay kugu habboon tahay.

## BAADHISTA CAAFIMAAD



Maamulku waxay kuu sheegi karaan inaad marto baadhitaan caafimaad oo ku saabsan calaamadaha dhibaatooyin hore ama dhaawac culus. Baadhistu waa bilaash oo waxa lagu weydiin doonaa uun ogolaanshahaaga.

Waxaa lagugu wargelin doonaa natiijooyinka baadhitaanka, kuwaasoo lagu tixgelin doono qiimaynta codsigaaga Haddii maamulu aanu codsan baadhitaan, adiguna waxaad codsan kartaa baadhitaanka adiga oo kharashka iska bixiya.

Baaritaanka codsigaaga kama hor istaagayo hay'addu inay sii waddo go'aankeeda.

## SIDEE AYAAD KU HELI DOONTAA GO’AANKA CODSIGAAGA ILAALINTA CAALAMIGA AH?



Go'aan qoraal ah baa laguugu soo diri doonaa akoonkaaga elektaroonigga ah ee ku yaal Bogga Ilaalinta Caalamiga ah, ama boostada ama iimayl ahaan adiga ama lataliyahaaga sharci, haddii aad leedahay. Waxaa lagugu soo wargelin doonaa natiijada go’aan luuqada aad fahmi karto.

Haddii go’aanku noqdo mid diidmo ah, sababaha waxaa lagu sharxi doonaa go’aanka, waxaana laguu soo saari doonaa go’aan ku saabsan inaad dalkaga ku laabato.

### SUURTOGALNIMADA RACFAANKA



Haddii aanad ku qanacsanayn go'aanka waxaad qaadan kartaa racfaan. Taas macnaheedu waxa weeyi maxkamad Maxkamadda Magangelyada iyo Racfaanka Soo Celinta (TARA) ayaa dib u eegi doonta go'aanka. Waxaad codsan kartaa lataliye sharci oo bilaash ah si uu kaaga caawiyo racfaanka.

**Habraaca magangalyada ee xuduudka, laguuma oggola inaad ku sii nagaato dalka inta lagu jiro habka racfaanka ilaa mas'uuliyiinta ogolaato.**

Waxaad codsan kartaa in laguu oggolaado inaad sii joogto inta uu socdo habka racfaanka.

Waxaad u baahan tahay inaad soo gudbiso racfaankaaga iyo codsigaaga joogitaanka inta lagu jiro wakhtiga cayiman ee lagu sheegay go’aanka. Waxaad heli doontaa macluumaad faahfaahsan oo dheeraad ah haddii aad hesho go’aan diidmo ah.

Haddii aanad xaq u lahayn inaad ugusii jirto sababo kale, waa inaad ka baxda Ireland sida ku cad taariikhda. Haddii aanad si iskaa ah u bixin, si qasab ah ayaa lagugu celin doonaa.

# WAA MAXAY XUQUUQAHAAGU?

## WAAD LEEDAHAY XAQUUQDA AAD KU HELI KARTO TAAGEERO IYO ADEEGYO MARKAAD SUGAYSO GO’AANKA CODSIGAAGA EE ILAALINTA CAALAMIGA AH



Codsade ahaan, sharciyan waxaad xaq u leedahay:

- inaad sii joogto wadanka masuulka ah baadhitaanka codsigaaga, gaar goobta laguugu talagalay ee ku taala xuduudka, ilaa iyo inta baadhista lagasoo gabagabaynayo, iyo
- intaad helayso taageero soo-dhawayn iyo adeegyo.

Waxaad ka heli kartaa macluumaad ku saabsan taageerada soo-dhawaynta iyo adeegyada aad heli doonto buug-yaraha gooni ah.



## WAXAAD XAQ U LEEDAHAY INAAD HESHO TURJUMAAD



Haddii aanad hadli karin Ingiriisiga, Turjumaan ayaa kaa caawin doona inaad la xidhiidho maamulka inta lagu jiro diiwaangelinta iyo soo gudbinta codsigaaga iyo sidoo kale inta lagu jiro wareysigaaga gaarka ah. Turjumaanku waa bilaash.

Turjumaanku waa dhexdhexaad, micnaha cidna uma xaglinayo. Waxay ixtiraamaan sirta, mana la wadaagi doonaan wax kasta oo aad tidhaahdo cid ka baxsan maamulka awoodda leh.

Turjumaanku wax saamayn ah kuma laha go'aanka codsigaaga.

Si degdeg ah u wargeli maamulka haddii aadan fahmin turjumaanka ama aad u malaynayso in turjumaanku aanu dhexdhexaad ahayn.

## WAXAAD CODSAN KARTAA TURJUMAAN IYO WARAYSTE LAB AMA DHEDIG AH MARKAAD GALAYSO WARAYSIYADA GAARKA AH, HADDII TANI AY KAA CAAWINAYSO INAAD SI BUUXDA U SHARAXDO NAFTAADA WAXYAABAHA KU SAABSAN



Iyadoo ku xidhan sababahaaga iyo haddii ay jirto fursad, codsigaaga waa la fulin doonaa.

## WAXAAD LA TASHAN KARTAA LATALIYE SHARCI (QAREEN)



Wakiilka sharciga waa qof ku siiya talo sharci iyo/ama wakiilnimo markaad la macaamilayso hay'adaha inta lagu jiro codsigaaga ilaalinta caalamiga ah. Wakiilka sharciga waa mid ka madax bannaan hay'adaha wuxuuna matalaa danahaaga. Wakiilka sharciga ayaa kaa caawin kara codsigaaga ilaalinta caalamiga ah, habka magangalyada, iyadoo la adeegsanayo isgaarsiinta rasmiga ah waxayna kula imaan karaan inta lagu jiro wareysiga shaqsiyeed.

Waxaad xaq u leedahay inaad la tashato lataliye sharci marxalad kasta oo ka mid ah habka magangalyada adiga oo kharashka iska bixinaya..

Guddiga Gargaarka Sharciga – La-talinta Sharciga iyo Matalaadda

Waxaad ka codsan kartaa wakiil sharci Guddiga Gargaarka Sharciga. Wakiil sharci ayaa laguu magacaabi doonaa lacag la'aan, wuxuuna ku siin karaa talo sharci ka hor wareysiyadaada, iyadoo lala tashanayo arrin kasta oo soo baxda inta lagu jiro hawsha.

Haddii aad hesho go'aan diidmo ah oo aad rabto inaad racfaan qaadato, wakiilka sharcigu wuxuu kaa caawin doonaa inaad racfaan qaadato, u diyaargarowdo racfaankaaga wuxuuna ka soo qayb geli doonaa dhageysiga racfaanka adiga oo matalaya halkaas oo uu ka jiro dhageysi afka ah.

Haddii aad doorbideyso inaad doorato wakiil sharci, la wadaag macluumaadka xiriirka hay'adaha sida ugu dhakhsaha badan si ay ula socodsiiyaan codsigaaga.

## WAXAAD XAQ U LEEDAHAY IN LAGU OGEYSIIYO OO AAD CODSATO LATALIN SHARCI OO BILAASH AH



Waxaad codsan kartaa latalin sharci oo bilaash ah inta lagu jiro habraaca magangalyada. Tan waxa kujirta latalin sharci oo kaa caawisa gudbinta codsigaaga.

Latalin sharci micnaheedu waxa weeyi waxaad heli kartaa sharaxaado ku saabsan:

- xuquuqahaaga iyo waajibaadkaaga
- habraacyada kala duwan
- arrimaha sharci.

Waxaad ka codsan kartaa macluumaad iyo latalin sharci https://www.legalaidboard.ie/.

## WAAD LA XIDHIIDHI KARTAA HAY'ADDA QARAMADA MIDOOBAY EE QAXOOTIGA (UNHCR) AMA HAY'ADO KALE.




Waxaad ogeysiin kartaa oo la xidhiidhi kartaa UNHCR ama hay'adaha la shaqeeya tallaabo kasta oo ka mid ah habraaca magangalyada.

UNHCR waxay ilaalisaa danaha iyo xuquuqda dadka codsanaya magangalyada iyo qaxootiga. UNHCR ama hay'adaha la shaqeeya sidoo kale waxay bixiyaan macluumaad iyo caawimaad loogu talagalay dadka codsanaya magangalyada.

Faahfaahinta halka lagala xidhiidhayo UNHCR iyo macluumaadka ku saabsan habraaca magangalyada waxa laga heli karaa wabsaytka UNHCR. https://help.unhcr.org/.

Waxaad sidoo kale la xidhiidhi kartaa hay'ad kasta oo bixisa talo sharci ama latalin kale oo loogu talagalay codsadayaasha.

## WAA MAXAY WAAJIBAADKAAGU?

### RAAC SHARCIYADA wadankaN



### JOOG wadanka AAD KA CODSATAY ILAALINTA CAALAMIGA AH




Ha isku dayin inaad u safarto dal kale oo EU+ ah ama Boqortooyada Midowday (oo ay ku jirto Waqooyiga Ireland). Ha ka bixin goobta gaarka ah ee laguu sheegay inaad degto. Waxaa laguu oggol yahay kaliya inaad u safarto dal kale oo EU+ ah haddii maamulku kuu oggolaadaan.

### HUBI IN MAAMULKU KU HELI KARAAN IYO INAAD ILAALISO WAKHTIYADA BALLAMAHA




Waa inaad timaadaa dhammaan ballamaha gaarka ah markasta oo ay kaa codsadan maamulku. Waa inaad halkaa timaadaa wakhtiga loogu talagalay. Haddii aadan ka soo qayb geli karin ballan sabab macquul ah awgeed, si degdeg ah u wargeli maamulka oo sharax sababta.

## SI DHAMMAYSTIRAN ULA SHAQEEE MAAMULKA



Marka lagaa codsado, waa inaad samaysaa kuwan soo socda.

- Bixi faahfaahintaada shaqsiga ah.




- Bixi dhukumentiyada aqoonsiga. Haddii aanad haysan, sharax sababta.





- Haddii faraha iyo sawiro lagaa qaaday.





- Gudbi codsigaaga wakhtiga iyo goobta loogu talagalay.
- Kaalay waraysiga gaarka ah oo ka jawaab su'aalaha inta lagu jiro waraysiga.



- Ogolow in lagu baadho iyo alaabahaaga la baadho, haddi maamulku codsado inay sidaa sameeyaan. Baadhitaan waxa la samayn doonaa kaliya marka loo baahdo oo ay caddayn u jirto. Maamulu waxay kuu sharixi doonaan sababaha codsiga loo samaynayo. Baadhitaanka waxa fulin doona shaqsi kula jinsi ah waxaana loo samayn doona nidaam sharaftaada la ixtiraamayo.

## SHEEG RUNTA



Waxaad sheegtaa waxa uu aad muhiim ugu yahay sumcada codsigaaga. Taasi waa sababta ay muhiim u tahay inaad daacad noqoto oo aad bixiso macluumaad buuxa oo sax ah oo ku saabsan aqoonsigaaga, qoyskaaga, dalkaaga hooyo, sababaha aad uga tagtay dalkaaga, iyo sababta aadan u doonaynin inaad halkaas ku laabato.

Waxaa dhici karta inaadan xasuusan wax walba, sidaa darteedna waxaa dhici karta inaadan ka jawaabi karin dhammaan su'aalaha. Haddii sidaasi dhacdo, ha samaynin jawaabaha laakiin sharax inaanad xasuusan.

## BIXI FAAHFAAHINTA SAXDA AH EE HALKA LAGAALA SOO XIDHIIDHAYO EE LAGAA HELI KARO




Maamulku waa inay awoodaan inay ku helaan marka laga hadlayo codsigaaga ilaalinta caalamiga ah.

Haddii cinwaankaaga, iimaylka ama taleefanka aad baddesho, wargali maamulka isla markiiba. Waxaad ku wargelin kartaa mas'uuliyiinta wixii isbeddel ah emayl ahaan contact@ipo.gov.ie.

## SOO GUDBI DHAMMAAN MACLUUMAADKA IYO DHUKUMENTIYADA TAAGEERAYADA CODSIGAAGA

Haddii aad haysato dhokumantiyo aqoonsi, waa inaad soo bandhigtaa sida ugu dhakhsaha badan.

Waa inaad soo gudbisaa wixii macluumaad iyo dhukumanti kale ah oo ka caawin kara maamulka inay go'aamiyaan dalka mas'uulka ka ah baadhitaanka codsigaaga ama inay baadhaan codsigaaga. Dhukumentiyadani waxay noqon karaan, tusaale ahaan, baasaboorka, shahaadada guurka, buugga qoyska, kaadhrka aqoonsiga milatariga, caddeynta shaqada, kaadhka xubinimada xisbi siyaasadeed, shahaadooyin, warbixino maxkamadeed iyo booliis, sawirro iyo dhukumenti caafimaad ama kuwo maanka ah.

Uma baahnid inaad soo gudbiso dhukumantiyo kaliya ka kooban macluumaad guud oo ku saabsan dalkaga. Maamulka magangalyadu waxay ka warqabaan xaalada wadankaaga.





Waa inaad soo gudbisaa dhammaan macluumaadka iyo dhukumentiyada sida ugu dhakhsaha badan markaad dirayso codsigaaga. Haddii aadan haynin dhukumentiyada si degdeg ah, waa inaad soo gudbisaa marka aad hesho, adoo adeegsanaya akoonkaaga elektaroonigga ah ee ku yaal Bogga Ilaalinta Caalamiga ah ama emayl ahaan conatact@ipo.gov.ie

Waa waajib inaad soo bandhigto dhokumantiyo asal ah, intii suurogal ah. Waa inaanad tuurin ama meesha ka saarin dhukumentiyada aqoonsiga. Waa inaadan qarin wax dhukumenti ah oo khuseeya. Waa inaanad waligaa soo gudbin dhokumanti been abuur ah.

Haddii ay suurtagal tahay, oo inta aysan khatar dhicin, weydii asxaabtaada ama qaraabadaada inay kuu soo diraan dhukumentiyadaada.

## WAA MAXAY CAWAAQIBKA KA DHALAN KARA HADDII AANAD KASOO BIXIN WAAJIBAADKAAS?

### HABRAACAAGA MAGANGALYO WAA LA JOOJIN DOONAA




Tani waxay dhacaysaa haddii aad diido:

- inaad bixiso macluumaad marka lagaa codsado
- in faraha iyo sawiro lagaa qaado
- sii cinwaankaaga
- ka jawaab su'aalaha inta lagu jiro waraysiga gaarka ah.

Waxa sidoo kale dhici doona haddii:

- aanad gudbin codsigaaga wakhtiga loogu talagalay iyadoo aanu jirin sabab macquul ah
- aadan ka soo qayb galin wareysiga shaqsiyeed adoon haysan sabab dhab ah.
- aadan u soo wargelin maamulka marka lagaa codsado inaad sidaas sameyso.
- aadan ku sii nagaan goobta lagugu waajibiyay inaad joogto
- aysan kula soo xidhiidhi karin maamulka
- aad ka baxdo wadanka.

Codsigaaga waxa loo tixgelin doonaa **mid la joojiyay ama la diiday**.
Tani waxay ka dhigan tahay inaad waayi karto xaaladdaada codsade ilaalinta caalamiga ah iyo dhammaan xuquuqaha la xidhiidha.

Waxaad sidoo kale go’aansan kartaa inaad ka noqoto codsigaaga wakhti kasta inta lagu jiro habka magangalyada, tusaale ahaan, sababtoo ah waxaad go’aansatay inaad dalkaga ku laabato. Kiiskan oo kale, waxaad waayi doontaa xaaladdaada codsade ilaalinta caalamiga ah.

## NOOCYADA TAAGEERADA SOO-DHAWAYNTA IYO ADEEGYADA QAAR WAA LA DHIMI KARAA AMA LA JOOJIN KARAA



Xaaladaha qaarkood, maamulku waxay go'aamin karaan in la yareeyo ama la joojiyo nooc kamid ah taageerada ama adeegyada qaar. Maamulka ayaa kugu wargalin doona go'aanada noocaas ah hab qoraal ah kadib markay qiimeeyaan xaaladaada.

Waxaad ka raadin kartaa macluumaad dheeraad ah buug-yare kale

## CODSIGAAGA WAXA LAGA YAABA IN SI XUN LOO SAAMEEYO



Haddii aad bixiso macluumaad marin-habaab ah ama been ah oo ku saabsan aqoonsigaaga ama codsigaaga, ama haddii aad baabi'iso ama aad been-abuurto dhukumanti, tani waxay saameyn xun ku yeelan kartaa codsigaaga. Codsigaaga waa la diidi karaa oo waxa laga yaabaa inaanad helin ilaalin caalami ah.

Ilaalinta caalamiga ah sidoo kale lagaa qaadi karaa haddii maamulku ogaadaan goor dambe inaad runta ka been sheegtay inta lagu jiray habka magangalyada.

# WAXAAD HELI KARTAA TAAGEERO GAAR AH HADDII AAD U BAAHATO

Waa inaad maamulka si degdeg ah u wargelisaa haddii aad u baahan tahay taageero gaar ah. Baahiyadani waxay ka dhalan karaan xaalado kala duwan sida uurka, cudurka, ama waayo-aragnimooyinka dhibaatooyinka nafsi, jidheed ama galmo.

Maamulku waxay qiimayn doonaan xaaladdaada, waxayna bixiin karaan taageero dheeraad ah si loo fududeeyo ka qaybgalkaaga habka magangalyada. Tusaale ahaan, waxay shaqaale takhasus leh u qoondeyn karaan kiiskaaga



## MAXAA DHICI DOONA HADDII AAD RABTO INAAD KU LAABATO wadankaAGA?

Wakhti kasta inta lagu jiro habraaca magangalyada, waxaad go'aansan kartaa inaad si iskaa ah ugu laabato:

- wadankaaga ama
- wadanka aad soo dhaaftay ama waddan kale oo saddexaad, haddii aad xaq u leedahay inaad aado.

Waxaad ka heli kartaa caawimo duulimaadyada, dukumentiyada safarka iyo qabanqaabada safarka. Waxa kale oo aad heli kartaa taageero dhaqaale, iyadoo ku xiran xaq u yeelashada.

Haddii aad go’aansato inaad si iskaa ah ugu laabato, habka magangalyadaada waa la joojin doonaa ama waa la diidi doonaa, mana yeelan doontid xaqa aad ku joogto Ireland.

Haddii aad doonayso inaad si iskaa u ah u laabato, la xidhiidh maamulka ka masuulka ah ee Qaybta Soo Celinta Iskaa wax u qabso ee Xarunta Soo Dhaweynta Citywest adoo iimayl u diraya voluntaryreturns@justice.ie ama taleefanka +353 87 403 1651 Waxaad heli kartaa latalin iyo sidoo kale caawimaad ku saabsan soo noqoshadaada ammaan iyo sharci.



# XAQIIJINTA HELITAANKA MACLUUMAADKA

Waxaa lagaa codsan doonaa inaad xaqiijiso inaad heshay macluumaadka ku jira buug-yarahan adoo adeegsanaya akoonkaaga elektaroonigga ah ee ku yaal Bogga Ilaalinta Caalamiga ah.

Haddii aadan wax fahmin ama haddii aad qabtid su'aalo dheeraad ah, waxaad had iyo jeer waydiin kartaa shaqaalaha Xarunta Hoygaaga.

Buug-yarahaan waxa loogu talagalay keliya ujeeddooyin macluumaad ah. Isagu ma abuuro xuquuq iyo waajibaad midna. Wakaalada Midowga Yurub ee Magangalyada (EUAA) ayaa soo diyaarisay qaybta ugu weyn ee qoraalkan, waxaana EUAA oo keliya u oggolaan kara in la daabaco ama wax laga beddelo buug-yarahan, taas oo loogu talagalay dalalka xubnaha ka ah Midowga Yurub. EUAA mas'uul kama aha saxnaanta, nuxurka, dhammaystirka, sharcinimada ama kalsoonida macluumaadka ku jira buug-yarahan ee ay ku dareen dalalka xubnaha ka ah Midowga Yurub ama cid kale oo mas'uul ah. EUAA iyo cid u shaqaysa toona mas'uul kama aha sida loo adeegsan karo macluumaadka ku jira buug-yarahan.

© Wakaalada Midowga Yurub ee Magangalyada, 2025